



Xeerka Cabashada

Qeexitaano

Cowdaha- qofka xareynayo cabashada ka dhanka ah Degmada.

Qeybta 22- heerarka waxbarashada Gobolka Oregon ay go'aansatay waa inay la buuxiyaa si ay u noqdaan dugsi degmo caadi ah.

Go'aanka Ugu dambeeyo- go'aanka qoraalka ah ee ka soo baxay Degmada ee lxallyaa arrinta heerka Degmada. Qaar ka mid ah Go'aanada Ugu dambeeyo waxay leeyihiin xaquuqaha racfaanka oo dheeraad ah ee ku socdo hay'adaha kale.

La xaqiijiyay- go'aanka la gaaray kadib dib u eegida cadeynta oo ah inay jirto sabab lagu aamino in ku xad gudubka sharciga gobolka ama federaalka ama Xeerka Degmada uu dhacay.

Aan la Xaqiijin- go'aanka la gaaray kadib dib u eegida cadeynta oo ah inay jirto xad gudubka sharciga gobolka ama federaalka ama Xeerka Degmada uu dhacay..

Waan ognahay in markii qoysaska ay ku lugleeyihiin dugsiyada carruurtooda, carruurta waxay u badan yihii inay ku guuleystaan waxbarashada, ka qalin jabiyaan dugsiga sare, yeeshaan isku kalsooni, oo muujiyaan dabeeecado bulsho xoogan. Marka aan carruurta siino muhiimada go'aanadeena iyo talabooyinkeena, waxaan gaarsiin karnaa waaya argnimo fiican dhammaan ardayda iyo qoysaska. Wuxaan sidoo kale ognahay in dugsiga degmadeena uu adkaan karo iyo qoysaska iyo ardayda waxay yeelanayaan su'aalo iyo mararka qaar walaacyada ku saabsan manhajka, barnaamijyada, iyo waaya aragnimada.

Portland Public Schools waxay soo dhaweynaysaa muujinta dareenka taas oo ah fursad barasho, aan ku caddeyno ula jeedkayaga, iyo aan kaga qeybqaadano horumar joogto ah si loogu faa'ideeyo ardayda oo dhan. Wuxaan soo dhaweynaya wada sheekeysiyadaas oo waxaan fileynaa in dhammaan dadka weyn, oo ay ku jiraan barayaasha PPS iyo shaqaalaha kale, ay ku dayanayaan qiyamyadeena muhiimka ah--oo ay ku jiraan ixtiraamka, xiriirada, daacadnimada iyo sharafta, iskaashiga, iyo ka go'naanta xoogan ee sinnaanta jinsiga iyo cadaaladda bulshada--markii aan yeelano wada sheekeysigaas.



Xeerka Cabashada

Markii arday ama qoys ay qabaan walaac, waxaan ku dhiirogelinaa wada sheekeysiga sida tooska ah loola yeesho baraha ama waaxda sida tooska ah ugu lug leh arrinta. Waxaa jira shaqaale kaloo badan oo Degmada oo laga yaabo inay u suurtogasho inay kaa caawiyaan, oo ay ku jiraan maamulayaasha kormeera dugsiyo ama waaxyo gaar ah. Degmada ayaa sidoo kale leh [Xiriiriyaha Degmada iyo Qoyska](#), kuwaasoo ka caawin karo qoysaska inay helaan warbixin, ay ku xirmaan shaqaalaha Degmada, oo ay ka caawiyaan xalinta walaacyada.

Waxaan sidoo kale leenahay dhoor nidaamyada cabashada ee loogu tallogalay ardayda PPS, qoysaska, iyo dhammaan dadka ku nool gudaha bulshada Degmada PPS. Dhinacyadoo dhan ee cabashada Degmada waa in loola dhaqmaa oo loola dhaqmaa dadka kale ixtiraam iyo sharaf, iyo Degmada waxay siineysaa taageero kuwa cabashooyinka sameynayo si markaas nidaamka u leeyahay soo dhaweyn, loo heli karo, daahfuran, oo bandhigo balanqaadkeena xoogan ee sinnaanta jinsiga iyo cadaalada bulshada. Degmada waxay u xalineysaa cabashooyinka sida ugu dhaqsiha badan ee suurtogalka ah iyo sida waafaqsan sharciga gobolka.

I. Cabashooyinka: La heli karo; Tababarka; iyo Wargelinada Sannadlaha

A. Sharraxaada buuxda ee nidaamka cabashada, oo ay ku jiraan dhammaan foomamka, waa in laga helaa xafiiska maamulka Degmada iyo bogga hore ee websaydka Degmada ee laga helo [halkaan](#).

1. Cabashooyinka Degmada

Degmada waxay leedahay foomka cabashada caadiga ah (linkiga halkaan) oo cabashooyinka wax looga qabanayo waaxyada gaarka ah ee ku yaalo Degmada, sida walaacyada ama cabashooyinka la xiriiro diiwaangelinta iyo wareejinta, gaadiidka, diiwaanada waxbarashada, Title IX, iyo hoyga 504. Cabashooyinka waxay uga helayaan go'aan qoran oo ugu dambeeyo wakiilka Kormeeraha guud 60 maalmood gudahood ee ka bilaabaneyso helitaanka cabashada.

Cabashooyinka ama wargelinada ku saabsan xadgudubka carruurta waa in lagu aadiyaa islamarkiiba qadka Xadgudubka Carruurta ee 1-855-503-SAFE, sidoo kale sida kormeeraha PPS.



Xeerka Gudigga

4.50.030-P

Xeerka Cabashada

2. Qeypta 22 Cabashooyinka Rasmiga ah

(a) Cabashooyinka rasmiga ah sida waafaqsan qaunuunada Qeypta 22 ee Waaxda Waxbarashada Oregon [insert link to ODE website] oo ay ku jiraan kuwa ku saabsan heerarka waxbarashada iyo dhaqamada (cabirka fasalka, manhajka, iwm), barnaamijyada waxbarashada gaarka ah (laakin ma ahan cabashooyinka shaqsiga), caafimaadka iyo badqabka, fursadaha waxbarashada sinnaanta, badqabka ciyaaraha, xakameyn ta iyo/ama go'doominta, eexashada ama takoorida waxbarashada, aargoosiga ka dhanka ah arday ama waalidka/masuul, iyo ku guuldareysiga lagu baarayo cabashooyinka eexashada.

Haddii cowdaha uusan ku qanacsaneyn kadib markii uu ka daalay habraacyada cabashada Degmada, Degmada ay ku guuldareysato inay ku bixiso go'aan qoran 30 maalmood gudahood ee gudbinta cabashada tallaabo walba, ama Degmada ku guuldareysato ku xalinta cabashada 60 maalmood gudahood ee ka bilaabaneysa xareynta hore ee cabashada, cowdaha ayaa uga racfaan qaadan karo Waaxda Waxbarashada Oregon go'aanka ugu dambeeyo ee Degmada.

- b) Sababtoo ah cabashooyinku waxay noqon karaan tilmaame muhiim u ah caafimaadka ururka, Kormeeraha guud wuxuu siinayaa Guiddiga ugu yaraan sannad walba xogta ee (1) Qeypta 22 ee isbedelada, arrimaha soo baxaya, iyo jawaabaha Degmada, iyo sidoo kale sida qiimeyn ta nidaamka cabashada rasmiga ah; iyo (2) oo dulmarka cabashooyinka ee aysan maamulin nidaamka looga baahanyahay qaunuunka ama xeerka (tusaale, Title IX) ee lagu xareeyay iyadoo la isticmaalayo nidaamka cabashada Degmada ee quseeya arimaha saameeyo wax ka badan arday gaar ah ama dugsiga.
- c) Degmada waa inay siisaa tababar shaqaalaha Degmada loogu tallogalay ee sida loogu qaabilo Cabashooyinka Rasmiga ah sida waafaqsan Qeypta 22.

II. JADWALADA WAQTIGA CABASHOOYINKOO DHAN



Xeerka Gudigga

4.50.030-P

Xeerka Cabashada

A. Si loo baaro cabashada inta xasuustoodu dhowaan tahay oo marqaatiyada iyo dukumiintiyada ay u badan tahay in la heli karo, cabashada waa in lagu xareeyaa xadidaada waqtiga xiggo gudahood:

1. Laba sanno gudahood kadib markii xadgudubka la sheegay ama dhacdada sharci darrada ah ay dhacday ama dhibanaha soo oggaaday xadgudubka la sheegay ama dhacdada sharci darrada ah. Dhacdooyinka si dabci ahaan u sii jira, waqtiga xaddidaada ay ka bilaabato taariikhda dhacdada ugu dambeysay; AMA

2. Hal sanno gudahood kadib markuu ardayga ay saameysay uu qalin jabiyo, guuro, ama haddii kale ka tego Degmada, mid walboo ugu dambeysuo

B. Xadidaada waqtiga ee lagu gudbiyo cabashada rasmiga ah waxaa laga yaabaa inay Degmada u dheereeyso cabashooyinka arimaha badqabka ardayga ugu muhiimsan, oo ay ku jiraan kuwa ka soo baxo anshaxa shaqaalaha, xadgudubka galmaada ama anshaxa, ama eedeymaha kale ee waxyeelada ardayga.

C. PPS waxay aqbashaa cabashooyinka rasmiga ah ee qarsoodiga magac la'aanta ah ee la xiriiro arimaha Qeypta 22 oo i-meel ahaan anonymouscomplaints@pps.net iyo taleefonka 503-916- 3462. Kuwa sida qarsoon u cabanayo waa inay bixiyaan macluumaadka ugu badan ee suurtogalka ah markay sameynayaan cabashada. PPS waxay baari doontaa cabasho kasta, oo ay ku jiraan cabashooyinka qarsoon, sida ugu macquulsan.

III. XAREYNTA CABASHADA RASMIGA AH EE QEYBTA 22

A. TALLAABADA 1:

1. Cabashada qoran waa in lagu xareeyaa xiriiriyaha cabashada Degmada oo warqad ahaan, i-meel ahaan, ama foomka cabashada goran. Cabashada qoran waa inay ku jirtaa magaca iyo



Xeerka Cabashada

macluumaadka qofka cabanaya, qeexida cabashada, iyo magaca ardayga, haddii ay suurogal tahay. Way wanaagsanaan lahayd haddii cabashada qoran ay sidoo kale ku jiraan magacyada cid kasta oo kale oo ku lug leh, oo ay ku jiraan markhaatiyaasha sharraxaad ku saabsan dedaalada xalka loogu doonayay cabashada, iyo soojeedinta sida loo xallin karo. Qofka cabanaya ayaa heli doona aqoonsi qoraal ah oo ku saabsan helitaanka cabashada muddo 5 maalmood gudahood ah kadib marka la soo gudbiyo cabashada.

2. Dhammaan Cabashooyinka Rasmiga ah ee Qeybta 22 ee looga baaran dago sida waafaqsan xeerkaan waxay ku helayaan go'aan qoraal ahaan oo wax ka qabto walaac walboo la sheego oo wuxuu wataa sababaha go'aanka Degmada oo 30 maalmood gudahooda ah ee helitaanka cabashada, illaa dhinacyada ku heshiyaan inay kordhiyaan waqtiga ugu dambeeyo, oo go'aankana waxa ka mid noqonayo warbixinta ku saabsan tallaabooyinka xiga ee nidaamka cabashada.

IV. XAREYNTA RACFAANKA GO'AANKA CABASHADA RASMIGA AH EE QEYBTA 22

A. TALLAABADA 2: RAFCAAN KA QAADASHADA GUDDIGA DUGSIGA PPS

Haddii Cabashada Rasmiga ah ay ku saabsantahay arinta Qeybta 22 aanan si buuxdo loo cadeynin, cowdaha ayaa codsan karo dib u eegida eedeymaha aan la cadeynin ee Guddiga Dugsiga PPS. Codsiga dib u eegista waa in lagu soo gudbiyaa qoraal 10 maalmood gudahooda laga soo bilaabo markii cabashada la helo go'aanka Tallaabada 1.

B. Guddiga wuxuu ku codeynayaa racfaanka 30 maalmood gudahood ee ka bilaabaneysa codsiga qoran si aad uga racfaan qaadatid go'aanka Tallaabada 1 ee Degmada illaamaa dhinacyada isku raacaan muddo waqtidheer. Guddigu wuxuu helayaa diiwaanka qoran ee buuxo ee go'aamada ee Tallaabada 1. Cowdaha waa inuu sidoo kale yeeshaa diiwaan qoraal buuxo iyo qoraalo walba ama



Xeerka Cabashada

warbixinta la siiyo xubnaha Guddiga ka hor dhageysiga ku saabsan caabshada illaamaa haddii kale uu ku illaalsanyahay sharci ahaan.

Shaqaalaha degmada iyo cowdaha waa inay is dhaafsadaan warbixin walboo taariiqda oo qoraal ah ee ay rabaan inay u soo bandhigaan Guddiga ee dhageysiga racfaanka oo ugu yaraan 24 saacadood dhageysiga ka hor. Haddii warbixin cusub lagu bixiyo wax ka yar 24 saacadood ka hor dhageysiga Guddiga, cowdaha waxay ku weydiin karaan waqtii kordhin.

Dacwoodayaashu waxay kulan ama dhagaesi kasta u soo wadan karaan qareen ama qof caawiya. Wixii dhageysiyyada ka hor Guddiga, Degmada waxay soo ogeysiineysaa cowdaha oo shaqaalaha PPS waxay ka qeybgalayaan dhageysiga.

Sababtoo ah Guddiga wuxuu sameeyaa go'aan ugu dambeeyo ee racfaanka Tallaabada 1, xubnaha Guddiga waa inaysan iyagoo og u bilaabin ama sii wadin xiriirka cowdayaasha ee ku saabsan mowduuca cabashada ama si madax banaan u baar eedeymaha cabashada markii ay ogaadaan in Cabashada Rasmiga ah ee Qeypta 22 waa la xareeyay. Shaqaalaha degmada ayaa si joogta ah u ogeysiinayo xubnaha Guddiga ee ku saabsan Cabashooyinka Rasmiga ah ee Qeypta 22 ee la xareeyo.

Si aad uga dhigtid nidaamka si cadaalad ah oo daahfuransida suurtogalka ah, Degmada waxay bixineysaa dulmar qoran ee qaabdhismedka iyo qaabka dhageysiga ee cowdaha , awooda lagu gudbinayo qoraal dheeraad ah 24 sacaadood dhageysiga ka hor, sidoo kale sida meesha kulanka uu uga furanyahay ama uga xiranyahay dadweynaha iyo/ama warbaahinta. Cowdaha ayaa laga yaabaa inuu ku marqaati kaco markii cabashada la maqlo. Guddiga waa inay soo saaraan go'aan ugu dambeeyo ee dhageysiga kadib in go'aanka Degmada Tallaabada 1 uu yahay:

1. Lagu raacay oo aanan tallaabobo dheeri ah la qaadin;
Bogga 6 ee 10



Xeerka Gudigga

4.50.030-P

Xeerka Cabashada

2. Aanan lagu xaqijin guud ahaan ama qeyb ahaan oo waxay ku hagi kartaa Kormeeraha guud inuu qaado tallaabooyin kale ama xaalado kale ee tallaabo ah.

Iyo heshiiskaan ee cowdaha, Guddiga waxay ku hayn karaan cabashada sugitaan illaamaa taariiq ama dhacdo gaar ah.

Degmada waxay sameynesa dhammaan isku dayada macquulka ah ee lagu qorsheeyo kulan gaar ah ee lagu tixgeliyo racfaanka oo Cabashada Rasmiga Qeybta 22 ee waqtiga ku haboon cowdaha. Haddii, isku dayo badan iyo ugu yaraan 90 maalmood ayaa dhaافتay tan iyo markii racfaanka la sameeyay, suurtogal maysan noqon in lala xiriirito waqtiga kulanka cowdaha, Guddiga waxay u kulmi karaan tixgelinta racfaanka ku leeyahay qoraalada qoran ee la gudbiyay oo waxay ogeysiin siineysaa cowdaha.

Go'aanka ugu dambeeyo ee guddiga waxaa lagula socodsiiinayaan cowdaha qoraal ahaan. Haddii cowdaha uusan ku qanacsaneyn go'aanka Guddiga , cowdaha wuxuu ku xareyn karaa racfaan [Waaxda Waxbarashada Oregon \(ODE\)](#) sida uu ogolyahay [OAR 581-022-2370\(4\)\(b\)](#) iyo [OAR 581- 002-0005](#).

C. Adeeg-bixinta kale

1. Degmada waxay bixineysaa adeegyada turjubaanka ama fasiraada iyo qaabilaadaha kale si loo caawiyo cowdaha. Tallada sharciga ma ahan illaha ay bixiso Degmada.
2. Shaqaalahaa matalaada Degmada ee loo xilsaarayo baarista iyo ka jawaabida cabashada waa inuu ka fogaadaa qilaafyo walboo dano ah ama muuqaalka qilaafka danaha.
3. Ka aargudashada qofkasta oo soo gudbiya ama ka qeybqaata nidaamka cabashada ayaa si adag loo



Xeerka Gudigga

4.50.030-P

Xeerka Cabashada

mamnuucay. Aargoosiga oo tallaabo walboo ula kac ah oo ka joojineyo qofka macquulka ah inuu ka qeybqaato nidaamka. Qof kasta oo rumeysan inay aargudasho ku dhacday waa inuu si dhakhso leh ugu wargaliyaa Kormeeraha Guud ama Guddiga Agaasimayaasha PPS.

4. Degmadu waxay la wadaagi doontaa dacwoodayaasha macluumaadka ugu badan ee suurogalka ah ee ku saabsan natijjooyinkabaaritaanka waxayna kiisaska oo dhan, la wadaagi doonaan natijjada baaritaankeeda cabashooyinka. Hasa ahaatee, PPS badanaa waa laga mamnuucay shaacinta macluumaad gaar ah oo ku saabsan tallaabada anshax marinta ee lagu qaadayo shaqaalaha ama ardayga ku lug leh cabashada.

5. Guddiga wuxuu dhageysanayaa racfaanada cabashada ee ku lugleh diiwaanada ardayga qarsoodiga ah oo kulan u xiran dadweynaha iyo warbaahinta illaa ardayga ama qoyska codsadaan in rafcaanka lagu dhageysto kulan u furan dadweynaha.

6. Sida loogu adeegsaday xeerkan, "maalmo" waxaa loo aqoonsan doonaa "maalmaha jadwal-sannadeedka." Waqtii kasta oo jawaab bixin oo hoos timaada xeeerkan kuna beeganta dhammaadka isbuuca ama fasaxa sharciga ah waa loo gudbin doonaa maalinta shaqada ee xigta.

7. Degmada waxaa laga yaaba inaysan u suurtogelin hubinta qarsoodiga magacyada dadka ku xareeyo cabashooyinka sida waafaqsan xeerkaan.

8. Haddii ay cabashada ku eedeyneyso shaqalaha anshax xumida ka baxsan baaxada xeerkaan, xiriiriyaha cabashada ayaa ku soo ogeysiinayo Kormeeraha guud qoraal ahaan xareyntaas, iyo Degmada waxay ku dedaaleysaa inay qaab waqtiyeysan uga jawaabto.

9. Shaqaalaha hadda jira iyo kuwii horeba wax cabasho ee



Xeerka Gudigga

4.50.030-P

Xeerka Cabashada

ku saabsan shuruudaha, xaaladaha, ama xaalada shaqaaleysiintooda ah kama keeni karaan ayagoo adeegsanayo xeerkan.

10. Cabashooyinka uu horaan u xareeyay cowdaha, la baaray, oo laga jawaabay iyo racfaanada laga daalay ama waqtiga racfaanka uu dhacay, dib looma xareyn karo markii cabashada ay la xiriirto dhacdo gaar ah ama arinta horay wax looga qabtay.

D. Cabashooyin ka dhanka ah Kormeeraha guud ama xubnaha Guddiga Waxbarashada

Cabasho walba ee ku saabsan shaqsiga lagu soo eedeeyay anshax xumi ee Kormeeraha guud (but not tallaabada Degmada ee Kormeeraha guud laga yaabo inuu ku yeesho masuuliyada ugu dambeyso sida sarkaalka agaasimaha fullinta ee Degmada) waa inay kormeeraan Guddiga Waxbarashada.

Xubnaha guddiga waa iskaa wax u qabsadayaal u adeegayo awooda la doortay oo lagu xisaabin karo muwaadaniinta ku jирто Dugsiyada Dadweynaha Portland ee degmada oo tallaabadooda iyo boosaska xeerka. Cabashooyinka ku saabsan xadgudubyada anshaxeed ama ku xadgudubka sharciga ee ka dhanka ah xubin kamid ah Guddiga waa in loo gudbiyaa Guddoomiyaha Guddiga oo arrimahan u gudbin doona hay'adaha dowladeed ee ku habboon ama gacan saddexaad haddii aqlabiyyadda Guddiga ay aqbalaan gudbinta. Cabashooyinka la xiriira ku xadgudubka anshaxa ama ku xadgudubka sharciga ee ka dhanka ah Guddoomiyaha Gudiga waa in loo gudbiyaa gudoomiye ku xigeenka guddiga kaasoo u gudbin doona arrimahan hay'adaha dowlada ee ku habboon ama gacan saddexaad haddii aqlabiyyada Guddiga ay aqbalaan gudbinta. Haddii dhinaca sadexaad baaro cabasho, kadib marka la helo natijjooyinka baaritaanka, Guddiga waa inay ku go'aamiyaan, 30 maalmood gudahood, oo kulanka furan tallaabadee, haddii ay wax jiraan, waa la damaanad qaaday.

E. Cabashooyinka loo gudbiyya xubnaha Guddiga



Xeerka Cabashada

Waxbarashada

Xubnaha guddiga dugsiga ee ka helaa Cabashooyinka Rasmiga ee Qeypta 22 xaafadaha ama shaqaalaha waa inay u soo gudbiyaan cabashooyinka xiriiriya cabashada Degmada. Xubnaha guddiga waa inay u soo gudbiyaan dhammaan cabashooyinka kale dugsiga ku haboon ama waaxda si markaas wax looga qabto walaaca.

V. XUQUUQAHADHEERAADKA AH EE RAFCAAN QAADASHADA

Haddii eedeyamaha cabashada xadgudubka Sharciga Maamulka Oregon (OAR) Cutubka 581, Qeypta 22 (Heerarka), Sharciga Erogen ee Dib loo eegay (ORS) 339.285 illaa 339.383 ama OAR 581- 021- 0550 illaa 581- 021- 0570 (Xakameynta iyo Go'doominta), ama ORS 659.852 (Aargoosiga), iyo cabashada laguma xaliyo dhinaca nidaamka cabashada, cowdaha, kaasoo arday ah, waalid ama masuul arday dhigta dugsi ku yaal Degmada ama qof degan Degmada, ayaa uga rafcaan qaadan karo go'aanka ugu dambeeyo ee Degmada ku socoto Ku xigeenka Kormeeraha guud ee Waxbarashada Dadweynaha sida lagu tilmaamay Sharciga Maamulka Oregon (OAR) 581- 002- 0005.

Haddii cabashada ay ku eedeyneyso takoor sida waafaqsan ORS 659.850 (Takoorka Waxbarashada), cowdaha wuu ka racfaan qaadan karaa go'aanka ugu dambeeyo ee Degmada ee ku socoto Oregon Waaxda Waxbarashada ama waxaa laga yaabaa inay cabasho toos ugu xareeyaan Waaxda Waxbarashada Mareykanka iyadoon la yeelan habraacyada Degmada la dhameeyay sida waafaqsan xeerkaan.

Ka sokow adeegsiga nidaamka cabashada ee Degmada, cabashooyinka Waxbarashadda Gaarka ah ayaa toos loogu gudbin karaa Waaxda Waxbarashada Oregon. Cowdaha waa inay soo dirtaa koobiga cowdaha ee Degmada iyo Waaxda Waxbarashada isku markaas.

Waxaa la qaatay 11/2014; La badelay 6/12/18, 6/15/2021, 7/12/2022, 6/13/2023

Tixraac(a/yada) Sharciga:

[ORS 192.610 to 192.690](#) [ORS 332.107](#); [ORS 339.285 to 339.383](#); [ORS 659.852](#); [OAR 581-022-2370](#)